PORTLAND PUBLIC SCHOOLS REOPEN

# Wararkii ugu Dambeeyey, Xaqiiqooyinka iyo Faahfaahinta Heshiiska Hordhaca ee Dib U Furista Iskuulada

**Maarso 17, 2021**

Qoysaska Qaaliga ee PPS ,

Sidii aan maalintii idiinla wadaagnay, Dugsiyada Dadweynaha Portland iyo Ururka Macallimiinta Portland (PAT) waxa ay wada gaareen heshiis hordhac ah oo dib loogu furayo iskuulada PPS iyada oo waxbarashada fasalada ardaydu ku qaadan doonto, laga bilaabo ardeydeena ugu da' yar oo bilaabi doonto waxbarashada bisha Abriil 1deeda iyo 2deeda 2021. Waxaa naga xusuusin ah, inay ardaydu waxbarashada qaabka iskudhafan ay qeybna ku qaadan doonaan fasalada iskuulada qeybta kalena guryahooda.

Heshiiskani hordhaca ah waxa kaliya uu sugayaa in loo codeeyo iyaga oo ay u codeyn doonaan xubnaha Ururka Macallimiinta Portland iyo Golaha Waxbarashada. Codeynta golaha waxaa la mudeeyey maalinta Khamiista ah, Maarso 18 saacadu marka ay tahay 6 p.m. Ka dibna marka loo codeeyey waxaa ku xigi doonta ansixinta xubnaha PAT.

*Fadlan waxaad ogaataa in fasalada K-1 ay waxbarashadooda ku qaadan doonaan fasalada iskuulka maalmaha Jimcaha, Maarso 19keeda iyo mar labaad Maarso 29 ilaa 31keeda. Fasalada 2 ilaad 5 waxa ay waxbarashadoodii ku qaadan doonaan iskuulada maalmaha Maarso 29keeda ilaa Abriil 2deeda.*

Waxa aanu ogsoonahay inay suurtagal tahay inaad qabto su'aalo ku saabsan heshiiska hordhaca ah, heshiiskaasi oo aad ka heli karto marka aad gujiso halkani. Halkan waxaaa aad ku arki waxooga hordhaca heshiiska ka mid ah:

**WAQTIGA**

- Pre-K ilaa fasalada 1aad waxbarashada isku dhafani waxa ay bilaabmi doontaa bisha Abriil 1deeda iyo Abriil 2deeda.
- Fasalada 2 ilaa fasalada 5 ee waxbarashada iskudhafan waxa ay bilaabmi doontaa maalinta Isniinta ah ee bisha Abriil 5teeda.
- Fasalada 6aad ilaa 12naad waxa ay waxbarashada iskudhafan bilaabi doonaan todobaadka bisha Abriil 19keeda.
- Ardayda waxbarashada iskudhafan waxa ay waxbarashadooda loo kal qeybin kooxo qaadan doona subixii iyo galinka dambe( dhammaan ardayda dugsiga dhexe iyo kuwa dugsiga sarre waxa ay waxbarashadooda ku qaadan doonaan fasalada iskuulada iyaga oo noqon doona kooxaha galinka dambe).

- Wajigani aanu dib ugu soo celineyno wuxuu buuxinayaa shuruudaha ay dhawaan guddoomiyaha gobolku wareegtada ku soo saartay iyo iyada oo noo ogolaaneysa horumarinta xirfada, in la dhiso sidii loogu diyaargaroobayey iyo inay macallimiinta waqti u helaan sidii ay ugu heli lahaayeen qorsheynta lagama maarmaanka ah.

**JADWALADA**

- Ardayda fasalada PK-5 waxa ay waxbarashada fasalada gudahooda ku qaadan doonaan 2 saacadood iyo 15 daqiiqo maalin kasta (marka laga reebo maalmaha Arbacada).
- Ardayda dugsiyada hoose iyo kuwa dugsiyada sarre waxa ay waxbarashadooda fasalada gudahooda ku qaadan doonaa maalinta galinkeeda dambe. Inta badan, ardayda fasalada gudahooda waxbarashada ku qaadan doonaan waxa ay iskuulada iman doonaan iskuulada todobaadkii 2 saacadood iyo nus. Waxa aan sii wadi doonaa inaan raacno shuruudaha tilmaamaha in dadku kala fogaado taasi oo xadidi doonta tirada ardayda fasalkiiba wax ku baran doonto. Himiladayadu waxa ay tahay in ardayada dugsiga sarre ay yimaadaan dhismayaasha iskuulka todobaadkii labo jeer, sidoo kalena iyada oo aan xalin doono meeshii ay dhibaato ka timaado.
- Jadwalka dugsigeena dhexe iyo ka sarre wuxuu noo ogolaan doonaa sii waditaanka barashada iyo hawlaha barashada la dabaqayo: waqtiga ay ardaydu ay macallinka fasalka la joogaan waxa ay ardayda u ogolaan doontaan inay la falgalaan macallimiintooda iyo asxaabta da'dooda ah sidii ay uga wada hadli lahaayeen tuducyada si qoto dheer sidoo kalena ay gargaar ugu heli lahaayeen waxyaabaha ku adkaada inay fahmaan. Macallimiintu waxa ay xooga saari sidii ay ardayda siin lahaayeen casharada ku haboon kuwa u baahan in loo balbalaariyo sharaxa casharada ama ardayda u baahan u baahan gargaarka gaarka ah waxa ay u noqon fursado ay fasalo kooban kula qaataan waxbarashada ardayda da'dooda ah, iyo kooxo arday ah oo kala fogaanaya.
- Jadwalka waxbarashada iskudhafan qaabka loo qaabeeyey ee dugsiyada dhexe iyo kuwa sarre uma baahna in la bedelo macallimiinta ilaa iyada oo ay suurtagal tahay in macalliminkaasi uu ku maqan yahay fasax mooyeene.
- Waxaad tusaalayaasha jadwlada waxbarashada iskudhafan ee dugsiyada dhexe iyo kuwa sare ka heli marka aad gujiso halkan.

**CAAFIMAADKA IYO NABADGELYADA**

- Waa u diyaargarownay inaan si nabadgelyo leh u soo dhaweyno ardayda iyo shaqaalaha ku soo noqonaya iskuuladaa.
- Waxa aanu raaceynaa tilmaamo ay hagayaan iyaga oo uu sal u yahay saynis ilaa iyo inta uu dhammaanayo xanuunku, iyo iyada oo aan sii wadi doono in aan dhageysano khabiirada caafimaadka dadweynaha, oo ay ka mid yihiin Golaha Tallo Bixinta Dugsiyada Dadweynaha Portland.
- Waxa aan qol kasta oo fasalada ka mid ah dhignay mishiinka sifeeya hawada ee HEPA ama goob kasta oo loogu talogalay inay ku kulmaan macallimiinta iyo ardaydu.
- Dhammaan iskuuladu waxaa jooga Kalkaaliyaal Caafimaad.
- Dhismaha iskuul kasta wuxuu leeyahay gudidda nabadgelyada, oo ay ka mid yihiin xubnaha Ururka Macallimiinta Portland (PAT). Waxa ay socod ku mari doonaan inay isha mariyaan dhisme kasta bisha Maarso 19keeda.
- Waxa iskuulada yeela qalabkii lagu ogaan lahaa ardyda iyo shaqaalaha dareema inay leeyihiin astaamaha xanuunka COVID-19- iyada oo la raacayo habmaamulka OHA ee lagu raadinayo iyo habka loo karantiimeynayo.

**NIDAAMKA IYO HABMAAMUUSKA**

Iskuulku wuuu ka duwanaan doonaan sidiisii hore marka ay ardaydu waxbarashada iskudhafan qaadaneyso. Calaamado cusub, qalabka gacmaha lagu nadiifiyo meel ay ku dhagan yihiin, fasalada tirada ardayda wax ku baranayaa ay kooban yahay oo macallinka iyo ardaydu ay kala fog yihiin, sidoo kale macallimiinta iyo ardaydu waxa xirnaan doonaan maaskarada afku lagu daboolo.  Maalmaha soo socda, waxaad rajeysaa inay ku soo gaaraan fariimo fara badan iyo agabyo kaa caawiyo sidii aad diyaar ugu noqon lahayd maalinta ugu horeysa ee ardaygaagu ku soo noqonaya dhismaha iskuulka sanadkani.

**WAQTIGU WAA KII HABOONAA**

In ka badan 70%  qoysaska , oo ay ku jiraan in ka badan 60% qoysaska aan cadaanka ahayn, waxa ay noo sheegeen sahankayagii ardayda dugsiyada hoose inay diyaar u yihiin in ay ardaydoodu ku soo noqdaan iskuulada sidii ay waxbarashadoodii ugu qaadan lahaayeen. Tirada cudurka hoos ay u socotaa Degmada Multnomah iyo Oregon-ba.  Waxa aan waqti badan ku bixinay sidii aan ugu diyiaargaroobi lahayn sidii fasalada loogu nqoon lahaa. Iyo iyada oo ay iminka 100% ay shaqaalaha iskuulada heleen tallaalka COVID-19.

Waxaanu si tartiib ah ugu guuleysanay inaanu siino fursadaha ka jira dhismayaasha iskuulada ardaydeena bilihii la soo dhaafay ee sida: ciyaaraha, bandhiga farshaxanka, iyo Waxbarashada Fasalada ee Kooban(LIPI). Si kooban, waxaanu mar labaad helnay waayo-aragnimada cajiibka ah ee waxbarashada qof-iyo-qof iyo isdhaxgalka, sidoo kale waxaanu aad ugu faraxsanahay korodhaka fursadahani waxbarasho ee fasalada lagu qaadanayo ee waxbarashada iskudhafana.

Waxaanu doorbi lahayn in si dhammeystiran loogu furo, in hal mar dhammaan ardaydeena . Si kastaba ha ahaatee, waqtigani nalooma ogola inaan taasi sameyno marka la eego tilmaamaha Waxbarashada Badbaadada Waxbarashada, Diyaargarowga Iskuulada ee ay soo jeedisay Waaxda Waxbarashada Gobolka Orregon, oo ay ka mid tahay shuruudaha ku saabsan tirada xanuunka dadka uu hayo ee Degmada Multnomah iyo Xeerka 35 Isku Wareega, shuruudaha kala fogaanshaha loo xadiday ardayda inay markiiba hal fasal wada joogaan.

**TALLAABOOYINKA XIGA**

Waxa aanu kula socodsiin doonaa marka ay Golaha Waxbarashadu ay u codeeyaan heshiiska hordhaca ah habeenimada Khamiista, Intaas ka dib, fadlan waxaad booqan kartaa  bogayaga Dib U Furista PPS ama nala wadaag wixii su'aalo ah ama faalo ah adiga oo booqanaya Bogayaga Nala Hadal PPS. Waad mahadsan tihiin.